# Suurat As-Sajdah

# سُورَةُ السَّجْدَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. waxay ku tusin mucjisada Quraanka

الٓمٓ ١

2. soo dajinta Quraanka shaki kuma jiro, wuxuuna ka soodagay Eebaha Caalamka xaggiisa.

تَنزِيلُ ٱلْكِتَٰبِ لَا رَيْبَ فِيهِ
مِن رَّبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ٢

3. mise waxay dhihi waxaa been abuurtay (Nabiga) saas ma aha ee waa xaq Quraanku Eebahaa xaggiisa ka yimid si aad ugu digtid qoom uusan u imaanin dige kaa horeeya, si ay u hanuunaan,

أَمْ يَقُولُونَ ٱفْتَرَىٰهُ ۚ بَلْ هُوَ ٱلْحَقُّ مِن رَّبِّكَ
لِتُنذِرَ قَوْمًا مَّآ أَتَىٰهُم مِّن نَّذِيرٍ مِّن قَبْلِكَ
لَعَلَّهُمْ يَهْتَدُونَ ٣

4. Eebe waa kan ku abuuray Samooyinka, iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya Lix maalmood dhexdeed, markaasna ku istawooday* Carshiga «si u cunanta» idiinmana sugnaanin Eebe ka sokow wali (gargaare) iyo shafeece midna, ee miyeydaan wax xusuusanayn.

ٱللَّهُ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا
فِى سِتَّةِ أَيَّامٍ ثُمَّ ٱسْتَوَىٰ عَلَى ٱلْعَرْشِ ۖ مَا لَكُم
مِّن دُونِهِۦ مِن وَلِىٍّ وَلَا شَفِيعٍ ۚ أَفَلَا تَتَذَكَّرُونَ ٤

5. amarka Eebaa ka maamula Samada xagga Dhulka markaasaa amarkaasi xagga Eebe u koraa Maalin qadarkeedu yahay Kun sano oo waxaad tirinaysaana.

يُدَبِّرُ ٱلْأَمْرَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ إِلَى ٱلْأَرْضِ ثُمَّ يَعْرُجُ إِلَيْهِ
فِى يَوْمٍ كَانَ مِقْدَارُهُۥٓ أَلْفَ سَنَةٍ مِّمَّا تَعُدُّونَ ٥

6. kaasina waa Eebaha og wax maqan iyo waxa joogaba, ee adkaada ee Naxariista.

ذَٰلِكَ عَٰلِمُ ٱلْغَيْبِ وَٱلشَّهَٰدَةِ ٱلْعَزِيزُ ٱلرَّحِيمُ ٦

Eebe wuxuu halkan kusheegay inuu Quraanku ka soo dagay xagga Eebe'wax shaki'ahna ku jirin, wax Nabiga Muxamed ah Jeebkiisa kala yimidna ahayn, si loogu digo Dad jaahiliin ah oon hadda kar hor wax u diga helin, waxaa kalooy aayaduhu caddayn inuu ilaahay ku abuuray wax walba Lix Maalmood, wax Eebe ka soo hadhay oo wax anfici karaana uusanjirin Idam Eebe la‘aantiis, wax walbana isagaa maamula, wax walbana waa ogyahay. As-Sajdah (1-6).

* Ku ekaansho u qalanta annagoo sùgeeyno in Alle Carshigiisa ka sarreeyo sida ku soo noqnoqotay quraanka tilmaamaha Alle waa isku mid isku waddana mari, qaarna ha awilin qaarna ha sùgin (dib u eegaha).

7. Eebaa wanaajiyey abuuridda wax kasta, wuxuuna ka billaabay abuuridda Dadka Dhoobo, (Nabigii Aadam ahaa).

ٱلَّذِيٓ أَحۡسَنَ كُلَّ شَيۡءٍ خَلَقَهُۥۖ وَبَدَأَ خَلۡقَ
ٱلۡإِنسَٰنِ مِن طِينٖ ٧

8. markaas kayeelay faraciisii mid ka soo taxma Biyo tabaryar.

ثُمَّ جَعَلَ نَسۡلَهُۥ مِن سُلَٰلَةٖ مِّن مَّآءٖ مَّهِينٖ ٨

9. markaas ekeeyey oo ruuxdiisa ku afuufay idiinna yeelay maqal, Aragyaal iyo quluuba, waxyar baadse Eebe ku mahdisaan.

ثُمَّ سَوَّىٰهُ وَنَفَخَ فِيهِ مِن رُّوحِهِۦۖ وَجَعَلَ لَكُمُ
ٱلسَّمۡعَ وَٱلۡأَبۡصَٰرَ وَٱلۡأَفۡـِٔدَةَۚ قَلِيلٗا
مَّا تَشۡكُرُونَ ٩

10. waxay dhaheen Gaaladii ma markaan ku dhexluno dhulka (geeriyoonno) yaa abuurid cusub nala abuuri, saas ma aha ee iyagu la kulanka Eebahood bay ka gaaloobeen.

وَقَالُوٓاْ أَءِذَا ضَلَلۡنَا فِي ٱلۡأَرۡضِ أَءِنَّا لَفِي خَلۡقٖ جَدِيدِۭۚ
بَلۡ هُم بِلِقَآءِ رَبِّهِمۡ كَٰفِرُونَ ١٠

11. waxaad dhahdaa waxaa idin oofsan (dili) Malaga mowdka laydiin wakiishay markaasaa xagga Eebihiin laydiin celin.

۞قُلۡ يَتَوَفَّىٰكُم مَّلَكُ ٱلۡمَوۡتِ ٱلَّذِي وُكِّلَ بِكُمۡ
ثُمَّ إِلَىٰ رَبِّكُمۡ تُرۡجَعُونَ ١١

12. haddaad arki lahayd marka dambiilayaashu madaxa hoos u dhigi (qiyaamada) Eebahood agtiisa (iyagoo dhihi) Eebahanow waan aragnay waana maqalay ee naceli si aan camalfiican u fallo waan yaqiininaye (waxaad arki lahayd wax yaableh).

وَلَوۡ تَرَىٰٓ إِذِ ٱلۡمُجۡرِمُونَ نَاكِسُواْ رُءُوسِهِمۡ
عِندَ رَبِّهِمۡ رَبَّنَآ أَبۡصَرۡنَا وَسَمِعۡنَا فَٱرۡجِعۡنَا
نَعۡمَلۡ صَٰلِحًا إِنَّا مُوقِنُونَ ١٢

13. haddaan doono waxaan siin lahayn (ku toosin lahayn) Nafkasta hanuunkeeda hase yeeshee waxaa hormaray Hadalkaygii in laga buuxin Jahannamo Jinni iyo Insi dhammaan.

وَلَوۡ شِئۡنَا لَأٓتَيۡنَا كُلَّ نَفۡسٍ هُدَىٰهَا
وَلَٰكِنۡ حَقَّ ٱلۡقَوۡلُ مِنِّي لَأَمۡلَأَنَّ جَهَنَّمَ
مِنَ ٱلۡجِنَّةِ وَٱلنَّاسِ أَجۡمَعِينَ ١٣

14. ee dhadhamiya halmaanshihiinii la kulanka Maalintiinnan (qiyaame) annagunawaan idinka tagaynaa(maanta) ee dhadhamiya cadaabka waaridda camalkiinii dartiis.

فَذُوقُواْ بِمَا نَسِيتُمۡ لِقَآءَ يَوۡمِكُمۡ هَٰذَآ
إِنَّا نَسِينَٰكُمۡۖ وَذُوقُواْ عَذَابَ
ٱلۡخُلۡدِ بِمَا كُنتُمۡ تَعۡمَلُونَ ١٤

wax walba Eebaa abuuray'wanaajiyeyna abuurkiisa, Nabi Aadamna dhoobo ka abuuray Faraciisana Biyo ka ahaysiiyay, ruux, Maqal, Arag iyo caqlina u yeelay, laakiin Dadku waxyar bay Eebe ku mahdiyaan. Gaaladuna waxayba diidi soobixinta iyo la kulanka Eebahood, waxaase dhab ah inay dhiman Eebana ay u noqon Maalinta qiyaame'iyagoo dullaysan oo madaxa raaricin'oo xumaan oo idil qirsan, Eebaha ay warsan in adduunkii dib loogu celiyo si ay camalfiican ufalaan, hasayeeshee calaacal wax uma taro maalintaas'cadaab iyo dulli joogta ah yayna lakulmi. Mujaahid wuxuu yidhi: Malakumowd waxaa lookoobay dhulka oo looga dhigay weel oo kale uu wax ka qaadan markuu rabo. As-Sajdah (7-14).

15. waxaa uun rumayn aayaadkanaga kuwa marka lagu waaniyo aayadaha sujuud la dhaca kuna tasbiixsada mahadda Eebahood iyagoon is kibrinayn (isla waynayn).

إِنَّمَا يُؤْمِنُ بِـَٔايَـٰتِنَا ٱلَّذِينَ إِذَا ذُكِّرُوا۟ بِهَا
خَرُّوا۟ سُجَّدًا وَسَبَّحُوا۟ بِحَمْدِ رَبِّهِمْ
وَهُمْ لَا يَسْتَكْبِرُونَ ۩ ﴿١٥﴾

16. waxayna ka dheeraataa dhinacyadoodu jiifka iyagoo baryi Eebahood cabsi iyo rajaynba waxaan ku arzuqnayna wax ka bixiya.

تَتَجَافَىٰ جُنُوبُهُمْ عَنِ ٱلْمَضَاجِعِ يَدْعُونَ رَبَّهُمْ خَوْفًا
وَطَمَعًا وَمِمَّا رَزَقْنَـٰهُمْ يُنفِقُونَ ﴿١٦﴾

17. ma oga Nafu waxa loo qariyay kuwaas oo Indho ku qaboowsadaan abaal marin waxay camalfalayeen dartiis.

فَلَا تَعْلَمُ نَفْسٌ مَّآ أُخْفِىَ لَهُم مِّن قُرَّةِ أَعْيُنٍ جَزَآءًۢ
بِمَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١٧﴾

18. ruux Mu‘min ah mala midbaa mid faasiq ah, ma eka.

أَفَمَن كَانَ مُؤْمِنًا كَمَن كَانَ فَاسِقًا ۚ
لَّا يَسْتَوُۥنَ ﴿١٨﴾

19. kuwa rumeeyay (xaqa) oo camal fiican falay waxay mudan Jannooyinka Ma‘wa martiqaad waxay camal falayeen dartiis.

أَمَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّـٰلِحَـٰتِ فَلَهُمْ
جَنَّـٰتُ ٱلْمَأْوَىٰ نُزُلًۢا بِمَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١٩﴾

20. kuwase faasiqoobay waxay ku hoyan Naar, markay doonaan inay ka baxaanna waa lagu celin dhexdeeda waxaana lagu dhihi dhadhamiya Cadaabka Naartii aad beenin jirteen.

وَأَمَّا ٱلَّذِينَ فَسَقُوا۟ فَمَأْوَىٰهُمُ ٱلنَّارُ ۖ كُلَّمَآ أَرَادُوٓا۟
أَن يَخْرُجُوا۟ مِنْهَآ أُعِيدُوا۟ فِيهَا وَقِيلَ لَهُمْ ذُوقُوا۟
عَذَابَ ٱلنَّارِ ٱلَّذِى كُنتُم بِهِۦ تُكَذِّبُونَ ﴿٢٠﴾

21. waxaana dhadhansiinaynaa cadaab hoose cadaab wayn kasokow inay noqdaan darteed.

وَلَنُذِيقَنَّهُم مِّنَ ٱلْعَذَابِ ٱلْأَدْنَىٰ دُونَ
ٱلْعَذَابِ ٱلْأَكْبَرِ لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٢١﴾

22. yaa ka dulmi badan ruux lagu waaniyay aayaadka Eebihiis oo ka jeedsaday xaggeeda, anaguna dambiilayaasha waan ka aarsanaynaa.

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّن ذُكِّرَ بِـَٔايَـٰتِ رَبِّهِۦ ثُمَّ أَعْرَضَ عَنْهَآ ۚ
إِنَّا مِنَ ٱلْمُجْرِمِينَ مُنتَقِمُونَ ﴿٢٢﴾

Habeenka oo lacibaadaysto waxay sabab u noqotaa galidda Jannada Eebe, iyadoo Eebe laga cabsan lana rajayn'Xoolahana wax laga bixiyo, kuwaasun wax waynbuu Eebe u darbay. Abuuhurayre waxaa laga wariyay in Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) yidhi: Eebe wuxuu yidhi: Addoomadayda wanaagsan waxaan u darbay waxaan Ili arkin'Dhagna Maqlin'kuna soo dhicin qalbi Dad. Wuxuuna akhriyay aayadan.

«waxaa sheegay Bukhaari iyo Muslim iyo kuwo kale.» Mana sinna Mu‘min wanaagsan iyo Faasiq leexday, Mu‘minku Jannuu gali'Faasiqana waxaa lagu abaalmarin Naar, waxaana loo soo hormariyaa ciqaabo yar yar ka hor mid wayn bal inay noqdaan. dhabtuna waa inaan cidna ka dulmi bednayn ruux Quraanka lagu waaniyay oo ka jeedsaday'wuxuuna la mid noqon dambiilayaasha Eebe ka aarsado.

Qataade wuxuu yidhi: Iska jira ka jeedsashada xuska Eebe, ruuxii ka jeedsada xuskiisa wuxuu kadsoomay kadsoomidda uwayn'wuxuuna is waysiiyay iswaysiin daran. As-Sajdah (15-22).

23. dhab ahaanbaan u siinay Nabi Muuse Kitaabkii (Tawreed) ee hashakiyin lakulankiisa waxaana ka yeelay Kitaabkaas hanuunka Banii Israa‘iil.

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْكِتَٰبَ فَلَا تَكُن فِى مِرْيَةٍ
مِّن لِّقَآئِهِۦ ۖ وَجَعَلْنَٰهُ هُدًى لِّبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ﴿٢٣﴾

24. waxaana ka yeelay qaarka mid ah imaamyo ku hanuuniya amarkanaga markay samreen, waxayna ahaayeen kuwa aayaadkanaga yaqiiniya.

وَجَعَلْنَا مِنْهُمْ أَئِمَّةً يَهْدُونَ بِأَمْرِنَا لَمَّا صَبَرُوا۟ ۖ
وَكَانُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا يُوقِنُونَ ﴿٢٤﴾

25. Eebahaabaana kala bixin dhexdooda Maalinta Qiyaame waxay ahaayeen kuwo isku diidan.

إِنَّ رَبَّكَ هُوَ يَفْصِلُ بَيْنَهُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ
فِيمَا كَانُوا۟ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿٢٥﴾

26. miyayna ku hanuunin kuwaasi intaan halaagnay hortood oo quruun ah oy socon guryahoodii, taasina waxaa ku sugan calaamado ee miyayna wax maqlaynin.

أَوَلَمْ يَهْدِ لَهُمْ كَمْ أَهْلَكْنَا مِن قَبْلِهِم
مِّنَ ٱلْقُرُونِ يَمْشُونَ فِى مَسَٰكِنِهِمْ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ
لَءَايَٰتٍ ۖ أَفَلَا يَسْمَعُونَ ﴿٢٦﴾

27. miyeyna arkeyn inaan u soo kaxayno Biyaha Dhul abaar ah oon markaas ku soobixino Beero ay wax ka cunaan Xoolahooda iyo Naftooduba miyeyna wax arkaynin.

أَوَلَمْ يَرَوْا۟ أَنَّا نَسُوقُ ٱلْمَآءَ إِلَى ٱلْأَرْضِ ٱلْجُرُزِ
فَنُخْرِجُ بِهِۦ زَرْعًا تَأْكُلُ مِنْهُ أَنْعَٰمُهُمْ
وَأَنفُسُهُمْ ۖ أَفَلَا يُبْصِرُونَ ﴿٢٧﴾

28. waxay dhihi waa goorma kala xukunku haddaad run sheegaysaan.

وَيَقُولُونَ مَتَىٰ هَٰذَا ٱلْفَتْحُ إِن كُنتُمْ
صَٰدِقِينَ ﴿٢٨﴾

29. waxaad dhahdaa maalinta kala xukunka Gaalada ma anfaco Iimaankoodu lamana sugo.

قُلْ يَوْمَ ٱلْفَتْحِ لَا يَنفَعُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓا۟ إِيمَٰنُهُمْ
وَلَا هُمْ يُنظَرُونَ ﴿٢٩﴾

30. Ee isaga jeedso oo sug iyana ha sugeene.

فَأَعْرِضْ عَنْهُمْ وَٱنتَظِرْ إِنَّهُم
مُّنتَظِرُونَ ﴿٣٠﴾

Eebe wuxu sheegay inuu diray Nabi Muuse oo siiyay Kitaabkii Tawreed, Nabigana wuxuu faray inuusan shakiyin lakulankiisa, Kitaabkaasuna wuxuu hanuun u ahaa Bini israa‘iil oo qaar kamid ah Imaamyo laga dhigay markay toosnaadeen. Eebaana Dadka kala bixin qiyaamada waxay isku diidanaayeen adduunka, Dadkuna waa inay ku waana qaataan umadihii ka horeeyey ee la halaagay iyo sida Eebe u nooleeyo dhul dhintay oo abaaroobay uguna soo bixiyo Cunno lagu noolaado. Tan kale ma habboona in ladadajisto imaatinka Saacadda Qiyaame'Illeen markay timaado Gaal wax uma taro rumayne, waxayna ku dhamaatay Suuradu in lala sugo gaalada abaalkooda.
Sufyaan wuxuu yidhi: Saasay noqdeen kuwaasi. Kumana haboona ruux inuu noqdo Imaam lagu daydo intuusan adduunyada iska qabanin.
Mar la waydiiyay Sufyaan hadalkii Sayid Cali: Samirku Iimaanka wuxuu u yahay sida Madaxu Jidhka uyahay wuxuu yidhi: Markay qabsadeen amarka Madixiisii yey noqdeen Madax. As-Sajdah (23-30).